

Qalabka Baarista COVID-19

(COVID-19 Self-Tests)

Qalabka baarista COVID-19 (oo la yiraahdo baarista guriga ama qalabka baarista ee dadku iska soo iibsado) waa nooc ka mid ah baarista COVID-19 oo waa wax fudud oo si degdeg ah jawaab looga helo. Waxaad istimaali kartaa qalabka baarista ee guriga si aad go'aan uga gaarto yareynta fursadaha aad ku sii faafin karto COVID-19.

Waxaad isticmaali kartaa qalabka baarista adigoo qaatay ama aan qaadan tallaalka, adiga oo isku arkay calaamado, ama adigoo xanuunka qaba.



Goormaan ka fekeri karaa in aan isticmaalo qalabka baarista?

Waxaad ka fekeri kartaa inaad qalabka baarista isticmaasho haddii aad isku aragto calaamado ah COVID-19, marka lagu qaadsiiyo COVID-19, ama markaad meel aan ahayn bannaan la joogeyso dad aan qoyskaaga ahayn.



Haddii aad isku aragto calaamado oo aad haysato qalabka baarista, isla markiiba isticmaal.



Haddii uu qof ku qaadsiiyo COVID-19, isticmaal qalabka baarista ugu yaraan 5 maalmood ka dib markii lagu qaadsiiyey.



Haddii adiga ama dadka aad wada joogtaan aad khatar ugu jirtaan xanuun daran, isla markiiba waa in aad isa baarto ka hor kulanka ama ka hor wakhti ugu dhow kulanka.

Sidee ku heli karaa qalabka baarista guriga?

- Farmashiye ama dukaan si toos ah uga soo iibso qalabka baarista.
- Qaar ka mid ah shirkadaha ceymysyada caafimaadka ayaa soo celiya kharashka qalabka baarista.
- Haddii aadan heli karin qalabka markaad u baahan tahay, la xiriir xafiiska Qabiilka ama waaxda caafimaadka si ay kuugu helaan qalabka baarista.

Sidee baan u isticmaali karaa qalabka baarista?

Raac tilmaamaha ku dul qoran qalabka ee ah sida saxda ah ee aad saamiga isaga qaadeyso iyo sida aad isu baareyso. Haddii aadan iska qaadin saamiga ama aadan isaga baarin sida saxda ah, jawaab khalad ah ayaa kuu soo baxaysa.



Waa maxay macnaha jawaabta qalabka baarista?



Markaan qalabka baarista ku ogaado in aan xanuunka qabo. Maxaan sameyn karaa?

Marka la iska helo COVID-19 macnaheedu waa in faayruskii lagaa helay ama uu dhawaan kugu soo dhacay xanuunka. **Haddii aad calaamado isku aragto, guriga joog oo ka fogow dadka kale (xataa dadka aad la nooshahay ee aan xanuuneyn).** Waxaad dib ugu noqon kartaa hawlahii caadiga kuu ahaa, ugu yaraan 24 saac:

- Calaamaduhu waa in ay si guud kaaga soo ba'yaan, **oo**
- Waa in aysan qandho ku hayn (oo waa in aadan isticmaalin daawooyinka qandhada).

Marka aad dib ugu noqoto hawlahaagii caadiga ahaa, samee **taxaddar dheeraad ah 5ta maalmood ee ku xigta**, sida furitaanka daaqaadaha si aad uga hesho neecaw ama isticmaal mashiinka hawada sifeeya, gafuurxir, iyo in aad dadka ka fogaato markaad la jooqeyso meel ah gudaha.

Kala xiriir goob dhakhtar ah daaweynta **COVID-19 haddii aad khatar weyn ugu jirto in aad si aad ah u xanuunsato.** Haddii aad u maleyso in ay khaldan tahay natiijada baarista, la xiriir dhakhtar si loo soo go'aamiyo in baaritaan dheeraad ah in aad u baahan tahay iyo in kale.



Markaan qalabka baarista isaga waayo in aan xanuunka qabo. Maxaan sameyn karaa?

Haddii lagaa soo helay COVID-19, oo aan dhawaan lagu soo qaadsiiin, oo aadan isku arkin calaamadaha COVID-19, waxay u badan tahay in uusan kugu dhicin COVID-19. Waa in aad baaris kale isku sameyso ama joogto guriga adigoo ka fogaanaya dadka kale.

Haddii lagaa soo helo COVID-19 balse aadan isku arkin calaamado, marka labaad iska soo baar 48 saac ka dib markii lagaa waayey. Haddii aad mar kale isa soo baareyso, dhakhtar u tag oo waa in aad soo maro baarista molekuyuulka, sida baarista PCR, sababtoo ah waa sida lagu helo natiijo sax ah. Haddii xanuunka lagaa waayo, waxaa laga yaabaa in aad qabto faayrus kale oo ku dhaca hawamareenka oo waa in aad xanuunka ka ilaaliso dadka kula jooga.

Haddii aad wax su'aalo ah ka qabto jawaabta baarista kala xiriir dhakhtarkaaga.

Macluumaadyo dheeraad ah

Macluumaad dheeraad ah qalabka baarista: www.dhs.wi.gov/covid-19/self-testing.htm

Macluumaadka siyaabaha kale ee baarista: www.dhs.wi.gov/covid-19/testing.htm

Macluumaadka ku saabsan daaweynta: www.dhs.wisconsin.gov/covid-19/treatments.htm

